

SOOMAALIYA

XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO – JUUN 2019



FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

- **279,635** oo bukaan ah ayaa waxay ka faa'ideysteen Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah oo ka socda 29-ka xarumaha caafimaadka ah.
- **53,734** oo bukaan ah ayaa lagu daaweeyey Barnaamijka Nafaqo-ku daaweynta Bukaan-socodka.
- **20,712** la talin ah ayaa laga bixiyey qolalka xaaladaha degdegga ah ee afarta isbitaal ICRC-du taageerto.
- **1,918** oo bukaan ah ayaa daryeel ka helay labada xarumood ee xanaanada degdegga ah oo ku kala yaala Baydhabo iyo Kismaayo.

Korjoogteyn: Wadarta **262** qof oo ka faa'ideystayaal ah oo adeegyada daryeelka caafimaadka asaasiga ah(DCA) ka helaya xarumaha caafimaadka Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed(SRCS) oo ay taageerto ICRC ayaa lala xiriiray si loo siiyo caawimaada la socoshada dhalimada ka dib. Bukaanadaan waxaa loo gudbiyey isbitaal si loogu daweeyo xaaladaha caafimaadka degdeg ah iyo kharajka gaadiidka oo laga bixiyey.



Akhri: [Maxay ka dhigan tahay in Soomaaliya gudaheeda lagu noqdo umuliso?](#)



FUDUDEYNTA HELITAANKA ADEEGYADA BIYO NADIIF AH IYO NADAAFADDA

- **40,000** qof ayaa waxay ka faa'ideysteen **8** nidaamyada biyo siinta ah oo la qalabeeyey kuwaas oo bixiya biyo nadiif ah.
- **41,300** qof oo dadka degaanka ah iyo barakacayaal oo ku nool Ceel Waaq ayaa waxay ka faa'ideysteen kulamo dhiirigelinta fayodhowrka ah, deeq saabuun iyo jeeri gaano oo ay bixiyeen **70** ka mid ah mutadawicnta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS).



CAAWINTA SIDII LOO HAGAAJIN LAHAA XAALADAH NOLOLEED EE MAXAABIISTA

- Waxaa la fududeeyey guryo ku celinta **17** maxaabiis la sii daayey oo loo hastay arrimo la xiriira colaadii hubaysneyd ee ka dhex qaraxday Puntland iyo Somaliland bishii Maajo 2018-kii

Akhri: [Somaliland/Puntland: 17 maxaabiis la sii daayay oo guriyahooda loo celiyay](#)



DIB-U-SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA (RFL)



- Iyada oo loo maraayo isweydaarsiga **71,368** Farriimaha Laanqayrta Cas ah (RCMs) oo gacan ka geysatay Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), fududeynta **66,512** wicitaano telefoon ah, adeegyada baafinta oo gacan ka geysatay helitaanka **243** shakhsi iyo magacyo gaaraya **5,183** oo laga akhriyey liiska “ Dadka Maqan” ee barnaamijka idaacadda BBC Soomaali.
- **788** wicitaano telefoon ayaa lagu fududeeyey gudaha barnaamijka socdaalka laga hirgaliyay Somaliland (Seylac & Boorama)



Akhri: [Soomaaliya: Dib- u- soo celinta Xiriirka Qoyska](#)



BIXINTA GARGAARKA DEGDEGGA AH IYO DIB-U-SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA



- **157,284** qof ayaa waxay heleen lacago caddaan ah si ay ugu daboolaan baahiyahooda degdegga ah.
- Dad kor u dhaafaya **45,078** qof ayaa loo qaybiyey cunto.
- In ka badan **36,624** qof ayaa la gaarsiiyey xirmooyin ay ku jiraan waxyaabaha muhiimka u ah qoyska.
- **8,862** qof oo ka tirsan **17** iskaashato beeralay ah ayaa waxay heleen cagaf-cagafyo, mashiinka wax lagu abuur, qalabka caro gediska, abuur iyo bacrimiye oo loogu tala galay wax soo saarka abuurka haruurka iyo galleyda.
- **2,700** carruur oo da'doodu ka hooseyso **5** sano iyo **732** haween uur leh iyo/ ama haweenka nuujinaaya ayaa loo gudbiyay Barnaamijka Bartilmaameedka ee Quudinta Dheeriga ah waxaana lagu daweeeyay plumpy sup iyo CSB plus ee sida u kala horeeyaan.
- **1,752** qof oo bulshooyinka kalluumaysatada Boosaaso iyo degaanada xeebaha ee Kismaayo ayaa helay doonyo, matoorada doonyaha, iyo xirmooyinka kalluumaysiga,
- **1,140** qoys oo ku nool **5** degaannada xeebaha Kismaayo ayaa helay qalabka loogu talagalay dhaqashada shinnida, tababarka xirfadaha ganacsiga, deeqo lacageed iyo tababaro farsamo oo ku saabsan dhaqashada shinnida.
- **696** qof ayaa ka faa'ideystay deeqaha soo kabsashada beeraha.
- **3,828** qof ayaa heley tababaro iyo deeq lacageed oo wax soo saar leh si loogu qaado ganacsigooda.

Korjoogteyn: Wadarta **67,839** qof oo ka faa'ideystayaal ah ayaa loo diiwaangeliyay barnaamijyada gargaarka iyo hab-nololeedka oo ay ku jiraan kuwa helay lacagta caddaanka ah iyo midda aan lacagta aheyn ayaa la meel mariyay.

Akhri: [Abaar aad u daran waxay leedahay magac](#)



XAQIJINTA ISLA-XISAABTANKA DADWEYNAHA DHIBAATADU AY SAAMEYSAY

Xarunta Xiriirka Bulshada (373):

- Ayada oo loo maraayo khadka telefoonka lacag la'aanta ah (373) ayaa waxaa la helay oo la nidaamiyay wadarta **2,536** farriimo oo ka kala timid degaanno kala duwan.



FAAFINTA AQQONTA IYO DHIIRIGELINTA MABAAD'IDA BANI'AADAMNIMADA IYO XEERKA CAALAMIGA EE BANI'AADAMNIMADA (IHL)

- In ka badan **2,090** hoggaamiyayaasha bulshada ah, haween, dhalinyaro, ka-faa'i deystayaal iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ayaa lagu wacyi-geliyey Mabaadi'da Asaasiga ah waxaana lagu wargeliyey hawlaha ICRC iyo SRCS iyo barnaamijyada .
- Qiyaas **355** xubnood oo ka tirsan ciidamada qalabka sida iyo kuwa aminga ayaa la siiyay warbixin ku saabsan mabaad'ida bani'aadamnimada iyo IHL-ka iyo sidoo kale hawlaha ICRC-da iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ka wadaan goobaha shaqada.

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaataadooda, waxayna badiyaa la shaqeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo,
Garowe, Baidoa, Beledweyne and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, October 2019

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa

instagram.com/icrc_afrique
blogs.icrc.org/Somalia